**X.M.J. 10 Disember 1962, lamba. 299**

**Nidamka hawlgallada xagga gurmadka iyo dib/u/dhiska.**

## MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA

Markuu arkay Qod. 85aad, ee Dastuurka;

Markuu tixgeliyey bahid loo qabo in nidaam loo dejiyo halgallada lacagaha iyo saadka, ee badeecooyinka iyo adeegyada xagga Guddiyada Gargaarka iyo Dib-u-dhiska ku xusan X.M.J. ee taariikh 10kii Disember 1961, lamba. 298

Markuu dhegeystay wasiirka Kowaad;

## WUXUU XEERAYAA

### Qod. 1
### Axkaamta Lacagaha

Dhammaan tbarrucaadka lacageed, ee xagga gargaarka loo fidinayo dadka duufaannada ku dhufteen, waa lagu shhubo xisaab socota oo ku qoran "Guddiga Taageera Duufaannada waxyeeleeyeen".

Dhammaan wixii lacag-bixin ah waa in ay noqdaan, guud ahaan iyo gaar ahaanba, kuwo uu amro "Guddiga Khaaka, ee Gaargaarka iyo Dib-u-dhiska. Wixii kharash ah oo ka badan Sh. So. 5.000 (shankun) waa in ay wataan idinka (ruqsada) Guddoomiyaha Golaha Wasiirrada, Maxdarrada kulamada Guddiga Gaarka ah, oo ay in uu saxiiro Sarkaalka (hawlwadeenka) u xilsaaran xaggaIsuduwidda (xiriirinta) ayaa kalsooni u ah sugutaan idmidda (ruqsaynta) kharashaadka.

Wixii lacag-bixin ah waa in ay ku cadyihiin idin-lacagbixin (waaran/ amar) oo ka kooban nuqul lamaan. Idinka lacag-bixinta waa in ay ku caddaadaan faafaahinno dhammeystiran, ee hawlgallada oo ay weliyaan qaansheegtooyinka iyo dokumentiyada kale oo lagama maarmaanka ah. Nuqulka asalka ah, ee idinka (amarka) waxaa haynaya Wakiillka Wasaaradda Lacagta, nuquka (koobigana) waxaa haynaya Sarkaalka qaabilsan xagga Isuduwidda.

Lacag-bixinnada waxaa la sameymayaa, ayada oo loo marayo soo-saarid jeegag laga bixinayo xisaabta soxota, ee lamba. 656, ee Bangiga Dhexe ee Qaranka (Soomaaliyeed).

Jeegagga lacagta ku qoran ay isugeynteeda gaarato ilaa Sh. So. 5000 (shankun) waxaa saxiixaya Sarkaalka xagga isuduwidda iyo Wakiilka Wasaradda Lacagta. Jeegagga ay ku qoran tahay lacagta ka badan tahay 5000 (shankun) waa in uu saxiixo Guddoomiyaha Golaha Wasiirrada ama Wasiir ama hawlwadeen uu asaguwakiisho.

Bangiga Qaranka Soomaaliyeed waxa uu Giddoomiyaha Golaha Wasiirrada, Wasiirka Lacagta iyo Sarkaalka xgga Isuduwidda, warbixin maalinle ah, ka siinayaa xaaladda xisaabeed, ee xisaabta socota lamba. 656, ee isla Bangiga.

WakiilkaWasaaradda Lacagta waa in uu, asaga oo haysanaya diiwaanka khsnadda iyo dhammaan qoraallada hab-xisaabeedka iyo hubinta oo khubarada xukuumadda, ee xagga hab-xisaabeedka iyo xisaab-hubinta, oo hadda kaddin laga magacaabayo xisaab-hubiye, uu u arko lagama maarmaan. Asagu waxa uu Guddiga khaaska ah iyo Guddoomiyaha Golaha Wasiirrada hor-dhigayaa – usbuuc waliba – nuqul minguurin xasaab, ee wixii dakhli ah iyo kharashaadka xisaabta 656, ee Bangiga Qaranka Soomaaliyeed oo uu asagu saxiixay iyo Sarkaalka xagga Isuduwidda,

Kontorool xisaabeed oo kooban ayaa waxaa bil kasta sameynaya xisaab-hubiyaha. Asagu waxa uu oggolaanayaa xisaab-celinta, haddii laga reebo gudbinta warbixinnada oo uu u arkolagama maarmaan. Gaar ahaan, xisaab-hubiyaha waxa uu muhmad siinayaa kharash kasta oo uu u arko in uusan ahayn lama huraan.

Xisaab-celinnada billayaasha ah, oo ay weheliyaan warbixinnada xisaab-naxlitiraha, ayaa loo soo bandhigayaa Guddiga Khaaska ah ee iyagu ansixinaya, marka laga reebo tallaabooyinka lagama maarmaanka ah in lagu qaado iyadoo lagu saleynayo warbixinnada xisaab-hubiyaha (xisaab-naxlitiraha).

Xiritaanka sanad maaliyadeed kasta iyo waliba marka Golaha Wasiiradu ku dhawaaqo in ay dhammaatay xaalada masiibada guud, Wasiirka Lacagta wuxuu diyaarinayaa warbixinno xilliyeed la saxiixay lana baaray, si waafaqsan faqradda siddeedaad iyo sagaalaad, ee kor ku xusan. Hubinta naxlisaaraha ka dib, xisaabcilinnada iyo warbixinnada la xiriira, Wasiirka Lacagta ayaa hor geynayawaxaa Golaha Wasiirrada, guddoomiyaga Golaha horey soo loo sheegayna wuxuu hor dhigaya Golaha Xeerdejinta Qaranka.

Marka uu Golaha Wasiirrada ku dhawaaqo in ay dhammaatay xaaladda Musiibada Guud, wixii ka soo hara xisaabta socota, ee 656, ee Bangiga Qaranka, waxaa lagu shubayaa xisaabta keydka kansiga Xukuumadda oo ka furan Bangiga Qaranka Soomaaliyeed, waxaana laga dhigayaa mid loo sticmaali karo kharashaadka dib-u-dhisidda.

## Qod. 2
## Saadad Badeecooyin iyo Adeegyo

Keydadka badeecooyinka iyo adeegyada oo sida caadiga ah loo iddmay waxa ay u dhacayaan ayada oo loo marayo heshiisyo la gelayo tartan dadweynaha u furan, mar kasta oo tirada ka badato Sh.So. 5000, shuruudaha iyo habraaca tartanka waxaa dejinaya Guddiga Khaaska ah (gaarka), ee Gargaarka iyo dib-u-dhiska:

Dhammaan keydadka, ha ahaadeeb kuwo la gaday ama hibo ah (lagu deeqay), waxaa la xaqiijinayaa goorta lagala wareegayo kedhaya dhexe, goboleed ama degmadeed, kuwaas oo bolleeto ka bixinaya badeecada la raray. Bolleetooyinkaas waxaa loo qorayaa laba koobi oo isku lammaansan. Marka ay khuseyso badeeco la gatay, bolleetooyinka asalka ah waxaa lagu xiraayaa waaranka lacag-bixinta; marka ay khuseyso badeecooyin hibo ah, ayagaas (boleetooyinkaas) waxaa la siinayaa hibeeyaha. Marka laga qaadato bakhaar oo la geenayo bakhaar kale, bolleetooyinka waxaa loo dirayaa (gudbinayaa) makhaasiinka badeecada laga wareejinayo.Bolleetada minguurinta (koobiga) waxa ay ku dhegenaaneysaa bolleetaariyaha.

Waxa laga saarayo bakhaarka (makhaasiinka) dhexe waxaa looga saarayaa kaliya idin iyo amar uu saxiixo Hawlwadeena *Sarkaalka (Isuduwidda. Xagga bakhaarrada kale, waxa laga saarayo waxaa idmaya (amraaya) guddoomiyayaasha Gobolladaamaraya ama Guddoomiyayaasha Degmooyinka hadba sida xaalku noqdo.

Keydhayuhu waa in uu hayo diiwaanka bakhaarka oo ku qorayo alaabta la qabto ama la wareejiyo. Raridda iyo dejinta badeecooyinka ku cad boogga dufcooyinka ee lambareysan waxaa lagu qorayaa, ayada oo lagu saleynayo bolleeto laba nuqul ah ama amar wareejin, hadba key tahay.

Foomamka looga shaqeeyo waxaa soo bandhigaya xisaab-hubiyaha.

Keydhayuhu waa inuu bil bil u gudbiyo ama marka uu dalbo Guddiga Khaaska, tirakoobka caddeynaya alaabta ku jirta bakhaarka.

Hawlwadeenka qaabilsan haynta xisaabaha waa inuu keeno, markuu helo dalabka Guddiga

Khaaska, warbixib-xisaabeed oo tilmaameysa alaabada la soo gaday oo ann weli la gelin bakhaarka.

Liiska alaabada raran waa in la raaciyo xisaabcelinta ku xusan faqradda 10aad.

**Qod. 3**
**Qodobbada Guud iyo kan ugu Dambeeye**

Guddoomiyaha Golaha Wasiirrada, oo dhegeystay ráyig Guddiga ka dhexeeya dhowrka Wasaaradood, ayada uu soojeediyey Guddiga Khaaska ah, waxaa dejinayaa qaddarka iyo habka loo qaybinayo cuntada iyo dharka, iwm, oo loo dirayo goobaha gargaarka.

Xog ku saabsan tirada dadka laga aqbalay xero kasta oogargaar iyo xogta kale ee lagama maarmaanka u ah waa in la siiyaa xisaab-naxlibixiyha si uu u guto waajibaadkiisa. Xisaab-naxli-bixiyaha ayaa u-idman inuu kormeer ku sameeyo bakhaarada ama inuu ku idmo, qoraal ahaan, saraakiisha inay sameeyaan kormeerrada aan soo sheegnay iyagoo asaga ka wakiil ah.

Awoodaha iyo waajibaadka, xilalka Hawlwadeenka Isuduwidda ayada oo lagu saleynayo xeerkan, waxaa la fulin karaa, haddii ay dhacdo carqalad, sabab kasta ha ku timaadee, xubin ka tirsan Guddiga Gaarka ah oo uu ku magacaabay qoraal Guddoomiyaha Golaha Wasiirrada.

Muqdisho, 10 Disember 1961.

**Aden Cabdulle Cusmaan**

Wasiirka Kowaad
**Cabdirashiid Cali Sharmarke**

Waa arkay waana diiwaangeliyey –

Diiw. lamba. 9 – xaashi lamba. 190.

Muqdisho, 13 Disember 1961.

Hantidhowraha: **Axmed Dahir**